

WARGALINTA BULSHADA XEERKA AASAASIGA

Waaxda Asluubta ee Minnesota

Waa maxay Wargalinta Xeerka Bulshada Minnesota ?

Xeerku wuxu shardi ka dhigayaa in lagu magacaabo halista darajada khatarta dambiilayaasha loo diiwaangalinayo faraxumaynta inta aan laga sii dayn xabsiyada dawladda ama meelaha lagu daweyo. Xeerku wuxu kalo shardi ka dhigayaa in sideynta dambiilaha la ogeysiyo bulshada. Laga bilaabo Janaayo 1, 1997, ama wixii ka dambeeya, Sharcigu wuxuu dabaqayaa dambiilayaashii laga sii daayaya xabsiga (M.S. 244.052).

Waa maxay diiwaangelintu?

Laga soo billaabo Julayo 1, 1991, dambiilayaasha faraxumeeya caruurta waxa sharuud looga dhigay, in ay diiwaan geliyaan cinwaankooda, oo ay u sheegaan wakaaladaha ilaaliya sharciyada degmada (M.S. 243.166). Wakaaladaha sharciga fuliya waxey u tabinayaan macluumaadka Wakaaladda ku shaqada leh qabashada dambiilayaasha (Minnesota Bureau of Criminal Apprehension), taasoo kaydisa macluumaadka, si ay u isticmaali karaan wakaaladaha sharciga ilaaliya sidii ay dambiga u baari lahaayeen.

Yaa lagu tilmaami karaa khatartan?

Darajooyinka halista khatarta waxa ku sifeysan ugarsayaasha dambiilaha ah:

- 1) Laga siidaayay xabsiga dawlada gobolka Minnesota;
- 2) Laga siidaayay gobol kale xabsigiisa, oo yimid gobolka Minnesota, isagoo la ilaalinayo;
- 3) Laga siidaayay xabsi federal ah, hasayeeshe ku tala jira in uu Minnesota dego;
- 4) Laga siidaayay xarig uu ku galay faraxumayn khatar ah, ama dad madaxa looga jiro; ama
- 5) Ay soo codsadeen hayadaha fulinta sharciga ee meesha uu joogo marka laga siidaayo xabsiga federaalka ama xabsi dawlalad goboleed (oo aan dusha laga ilaalinayn).

Julaay 1, 2010, qiyaas ahaan, 16,000 ayaa Gobolka Minnesota la diiwan geliyaya 6,600 oo ka mid ah ayaa ugaarsatayaahaas ayaa hoos galaya qaybta aan soo sheegnay oo ku sifeysan darajo halis ah.

Waa maxay heerarka khatarta?

Heerka 1 - khatar bulshada ah oo yar

Heerka 2 - khatar bulshada ah oo dhexe

Heerka 3 - khatar bulshada ah oo sare

Yaa go'aaminaya heerarka khatarta?

Dhammaadka Xarigga Guddiga Dib-u-eegista (ECRC) oo ka dhisan xabsiyasha Minnesota ama meelaha lagu daweyo ayaa go'aaminaya heerka khatarta. Dambiilayaasha laga siidaayay xabsiga federaalka ama meelo ka baxsan xabsiyada gobolka, ECRC ka tirsan Waaxda Asluubta Minnesota (DOC) Xaafiiskeeda Dhexe ayaa xilkaas qabanaya.

Yay yihiin xubnaha ka tirsan ECRC?

- 1) Madaxa ilaalada xabsiga ama madaxa xarunta xannaanada oo uu ku xiranyahay dambiiluhu ama dadka loo xilsaaray;
- 2) Sarkaalka fulinta sharciga;
- 3) Xirfadlayaasha loo tababaray qiimaynta dambiilayaasha wax faraxumeeya;
- 4) Shaqaalaha u tababaran dusha ka ilaalinta dambiilayaasha faraxumeeyasha; iyo
- 5) Xirfadlaha adeegyada dhibanaha.

Waa maxay waxa ay eegayso ECRC marka la magacaabayo heerka khatarta?

Xogta kala duwan, oo ay ka mid tahay;

- 1) Khatarta dambiga;
- 2) Dambiyadii hore ee dambiilaha;
- 3) Shaqsiyada dambiilaha, sida uu u waajahay daaweynta iyo dadaalladi hore iyo raad raaca mukhaadaraat/maandooriye;
- 4) Jirataanka gargaarka uu dambiilaha ka helo bulshada sida daaweynta cudurada, helidda nolol deggan oo la kormeerayo, xiriirka qoyska iyo bulshada iyo tixgelinta aqoondarrada dambiilaha ama deganaansha la'aanta shaqada;
- 5) Haddi dambiilaha uu muujiyo, ama ay jiraan caddaymo la rumaysan karo marka loo eego raad raaciisi hore, in uu dambiiluhu laga yaabo in uu dib dambiga bulshada uga galo; iyo
- 6) Haddi dambiiluhu muujiyo xaalado muuqda oo yareynaya halista ah in uu dib u galo dambiga oo ay ku jiraan hasayeesho aan ku koobnayn da'da weyn ama xaalado jirro daciifisay oo ka muuqata.

Ma la baddali kara heerka khatarta?

Haa. 14 maalmood gudahood, dambiilaha ah heerarka 2 ama 3 wuxuu ka codsan karaa garsooraha maamula sharciga in hoos loo dhigo. Sidoo kale, saddex sano ka bacdi billowgii heerka khatarta sheegideedi, dambiiluhu wuxuu codsan karaa in ay tixgeliso ECRC heerka hoos u dhigidda.

Yaa u xil saran wargelinta bulshada?

DOC waxay u diyaarinaysaa xogta laga helo ECRC hayadaha sharci fulinta oo mas'uul ka ah wargelinta bulshada uu la degi doono dambiiluhu.

Hayadaha fulinta sharciga yay wargelinayaan arrimaha ku saabsan siidaynta ama dib u dejinta dambiilaha?

Heerka 1- Dhibanayaasha ama markhaatiyada dambiga, iyo hayadaha kale ee sharci fulinta, iyo qof kasta oo uu xeerilaaliyuhu sheego in uu xog ka helay.

Heerka 2- Qof kasta oo ka mid ah macluumaadkii Heerka 1 xogta lagu bixiyay. Waxaa intaas dheer in wargelintu mudantahay in la siiyo dugsiyada, xarumaha xannaanada caruurta, iyo meelaha kale oo sii joogta ah ay dhici karto in laga heli karo dhibanayaasha dambiilaha. Hayadaha fulinta sharcigu waxay kaloo dooran karaan inay wargeliyaan dadka qaarkood oo la caaddeeyay suurtagalnimada khatarta. Macluumaadkaa hayadaha ama ururadu ma ah in ay dib u qeybiyaan.

Heerka 3- Dalabka wargelin caam ah oo baahsan, sida qaalibka ah waxaa lagu meel mariya kulan caam ah. Sharci fulintu waxay kalo wargelin kartaa shakhsiyaadka iyo hayadaha lagu sheegay Heerka 1 iyo heerka 2 wargelintooda, waxana loo adeegsan kara qalabka warbaahinta iyo qaababka kale oo dadweynaha wax lagu wargeliyo.

Maxaa lagu darayaa wargelinta ?

Deegaanka guud, faa-faahinta dambiilaha iyo masawirka, dhaqanka dambiilaha iyo waxyaabaha kale ee dambiilaha lagu yaqaan.

Heerarka khatarada ma wax bulshada wada ogtahay baa?

Heerarka 1 iyo 2 ma aha kuwa la faafin karo haddi aanay sharci fulintu si kale u qeexin sida ku cad Xeerka. Xogta heerka 3 dambiilayaasha waxa lagu qorayaa DOC websaytkooda isla marka uu dhaco fadhiga ugu horeeya oo lagu wargelinayo bulshada codso boolis(www.doc.state.mn.us/livel3.asp).

Inteebuu amarka wargelinta bulshada dambiilayaasha soconayaa?

Ilaa iyo inta ay shardi ku tahay dambiliyasha in ay is diiwaangeliyaan. Guud ahaan diwaangelintu waxay soconaysaa muddo toban sano ah, marka la siidaayo kaddib, ama uu ka dhammaado kormeerka saxitaanka, labada midki dheer.

Xaqiiqoinka la xariira Xeerarka Wargelinta Bulshada Minnsota

- Xeerka Wargelinta Minnesota wuxu hir galay Janaayo 1, 1997.
- Hawsha Heerarka khatarta sharciyan waa masuuliyadda Waaxda Asluubta Minnesota.
- Wargelinta bulshada sharciyan waa masuuliyadda Sharci fuliyaasha.
- Dambiilayaasha heerka 3 - kuwa lagu tilmaamay khatarta sare ee laga yaabo inay dib u galaan dambiga - waxaa lagu muujinayaa websayt caam ah.
- Dambiilayaasha sharcigu wuxuu qabanayaa Xeerka ilaa inta ay shardi ku tahay in ay is diiwaangelyaan.
- Dhammaan dambiilayaasha lagu sheegay heerarka khatarta ah, qiyaastii 60% waa heerka 1; 25% waa heerka 2; iyo 14% waa heerka 3.
- Qiyaastii 203 dambiilayaasha heerka 3 waxay ku nool yihiin bulshada Minnesota.



1450 Energy Park Drive, Suite 200
St. Paul, Minnesota 55108-5219
651/361-7200
TTY 800/627-3529
www.doc.state.mn.us
August 2010